***Dadka leh carruur da'dood tahay 0 – 5 sano***

Filimkan waxa loogu talogalay waalidiinta iyo dadka kale ee waaweyn ee xannaaneeya carruurta ama ka ag-dhow. Wuxuu si gaar ah u eegayaa sida looga caawinayo carruurtu inay yeeshaan xirfado luuqadeed oo xoogan, taasi oo u siinaysa aasaas fiican dugsiga. Luuqaddu waxay nagu caawisaa inaan muujino fikradaheena iyo dareenadeena, iyo sidoo kale inaynu fahamno adduunka inagu xeeran.

Waa waxyaalaha maalin kasta ee aad samayso waa waxa ugu muhimsan. Dhig wax kaste oo kale oo sii ilmahaaga dareenkaaga oo dhan uhelaan, una hur iyaga wakhti badan. Wada hadal yar oo kastaa wuxuu aasaaska u dhigayaa koboca luuqadeed ee ilmahaaga, taasi oo runtii bilaabanta marka ilmahaagu wali ilmagaleenka ku jiro, isaga maqlaya codka hooyada oo kaga falcelinaya laad.

Haddii aanad la qabsan caadooyinka Swedishka soojeedimahan qaarkood la yaab ayey kugu noqon karaan, markaa kaliya iskudey inaad isticmaasho kuwa aad xiisaynayso. Waxa muhiimka ah waa in ilmahaagu uu dhagaysanayo inta ugu badan ee suurogal ah luuqaddaada.

Marka ilmahaagu sii waynadaba, sheeko xariirada iyo buugaagta carruurta ayaa u noqon kara wax qiime leh. Waxay horumarin karaan adduunka iyo luuqadda ilmahaaga waxayna kaa caawin karaan korinta ilme dareen badan oo leh doonis caafimaad qabta inuu hadlo oo dhagaysto oo uu qoro oo akhriyo.

Filimkan waxa kujira waxqabadyo iyo layliyo loogu talogalay carruurta heerarka kala duwan ee koboca luuqadda. Waxaad ka heli doontaa tusaalayaal badan Swedish websaytka Kod-Knäckarna: www.kodknackarna.se. Waxaad sidoo kale samayn kartaa layliyadaada kuu gaarka ah ama waxaad waydiin kartaa xannaanada carruurta, shaqaalaha dugsiga-xannanada iyo macalimiinta luuqadda hooyo tallooyin iyo fikrado dheeraad ah.

## *1. Laga soo bilaabo dhalashada ilaa erayada ugu horeeya*

Dad waaweyn ahaan, waxaynu ku muujinaa nafteena siyaalo badan: waxaynu isticmaalnaa luuqad jidheed, weji ka hadal, hadal iyo qoraal. Sweden iyo waddamo kale oo reer galbeed ah, dadka waaweyn inta badan waxay la qabsadaan qaab gaar ah markay la hadlayaan carruurta yaryar. Waxaanu kula qabsanaa hadalkayaga, anaga oo u dhahayna erayada si faahfaahsan oo deggan, anaga oo isticmaalayna weedho kookooban carrabkana ku adkaynayna erayada ugu muhiimsan. Waxaanu sare u qaadnaa heerka codkayaga si fudud si aan u khafiifino, waxaanu kala duwnaa israaca codka si aad uga badan marka aanu la hadlayno qof weyn  oo kale waxaananu ku celinaa erayada dhawr jeer. Sidoo kale waxaanu ka taxadiraynaa inaanu isku dayno oo aanu qabsano jalleecada ilmaha. Hadalka qaabkan ah wuxuu ka caawiyaa ilmaha inuu fahmo hadalkeena oo dhugna u yeesho eraydeena. Dhaqamada kale, in badan oo kamid ah hadalka hore ee ilmaha wuxuu la qaataa walaalihiisa waawayn ama carruur kale.

Marka aynu la hadlayno lana ciyaarayno carruurta waa inaynu u dhawaano. Tani waxay sahlaysaa isu-daawashada, waxayna inaga caawinaysaa waxa ilmuhu tilmaamayo ama eegayo. Ilme tilmaamaya si uu kuu tusiyo wax wuxuu isticmaalayaa dhaqdhaqaaq jidheed oo uu ugu talogalay. Haddii aad kusoo foorarsato oo ay wejigaaga ka muuqato inaad wax ka sugayso, waxaad muujinaysaa inaad xiisaynayso oo aad jeclaan lahayd falcelin – kani waa sida falgalku u bilaabmo. Laakiin xasuusnaw, waxay qaadan kartaa muddo in ilmaha yar jawaabo. Si dhakhso ah ha u buuxin waxa dhiman; wakhti sii ilmaha.

Ku hadal luuqaddaada hana ka walaacin in ilmahaagu aanu kaa baranayn Swedish-ka. Badanka carruurta adduunku waa luuqado badnayaal. Marka ilmahaagu sii waynaadaba wuu ku maqli oo ku hadli Swedish dheeraad ah, sidaa darteed ku qaado sannadka koowaad ee ilmaha aasaasidda luuqaddaada hooyo.

Hal u muhiim ah falgalka iyo koboca luuqaddu waa in kursiga carruurta lagu riixo kugu soo JEEDO marka aad sii baxayso, si aad u sahasho xidhiidhka adiga iyo ilmahaaga u dhexeeya. Ilmahaagu wuxuu u baahan yahay inuu awoodo inuu KU arko marka wax kale oo kasta laga tago. Tani sidoo kale waxay kuu sahashaa inaad aragto waxa ilmahaagu ogaanayo ee uu kana hadlayo. Waxayna idiin oggolaanaysaa inaad wadaagtaan kaftan oo aad hees wada qaadaan.

1. Madadaalada iyo ciyaaraha dhallaankaaga:
   Marka aad beddelayso xafaayadda dhallaankaaga, u sharrax ilmaha waxa aad samaynayso.  “Sidaa darteed, imika waxaynu siibnay hal sharabaad!”. La ciyaar dhallaankaaga adiga oo taabanaya cagta, caloosha ama sanka. Adiga oo dhunkanaya cagta, dheh “*dhunko cagta yar*” sidaa darteed dhallaankaagu wuxuu dareemayaa hawada cagtiisa wuxuuna maqlayaa adiga oo carrabka ku adkaynaya erayga “c*ag*”. Carruurtu sidoo kale waxay ka helaan ciyaaro kale. Haddii aad taqaan wax heeso carruureed ah iyo ciyaaraha faraha oo luuqaddaada ah, isticmaal ama samee qaar cusub.

2. U hees ilmahaaga:
   Markaad ilmahaaga isku dhejiso adiga oo haya, wuxuu dareemi diirimaadka iyo gariirka jidhkaaga marka aad hadlayso oo aadna heesayso. Tan carruurta yaryari aad ayey uga helaan. Waxaad leedahay codka ugu quruxda badan adduunka! Xiitaa carruurta aadka u yaryar way ka helaan heesaha iyo heeso carruureedka. Laxanka iyo habdhacu waxay ku dhiirigaliyaan ilmuhu inuu si fiican u dhagaysto. U qaad heesihii carruurnimadaada ama qaar cusub u raadi.

3. Ciyaarta iyo dhaajinta/canjil
   Dhaajinta wejiga, ama 'wejiyo ururiska' waa ciyaar aad la ciyaari karto ilaa marka uu aadka u yar yahay. Tusaale ahaan, waxaad buuri kartaa dibnahaaga ama soosaari kartaa carrabkaaga. Sug inyar ilmahaaguna wuxuu samayn doonaa sidaas oo kale. Madaxa lul, gacan lul ku salaam oo madaxaaga rux si aad u muujiso ayna ahayn inaan samayno – kuwani waa jidh ka hadalyo ilmahaagu uu arkay adiga oo isticmaalaya oo uu si dhakhso ah u bilaabi doono inuu isticmaalo.

4. Siinta shayada magacyo:
   Ilmahaagu si dhakhso ayuu u korayaa. Nalka kore ee saqafka , kaasi oo la daari karo lana damin karo lana laalaadin karo, ayaa si lama-filaan ah aad u xiiso leh. In badan kahor inta ilmahaagu aanu erayga *dhihi* karin, waa *fahmaa* erayga. Imika waxa aad si firfircoon u bilaabi kartaa siinta magacyo waxyaalaha soo jiita xiisaha ilmahaaga. Ilmuhu wuxuu si dhakhso ah u bilaabi doonaa inuu la falgalo jabaqaha ugu muuqda inaanu hore u maqal. Maqalka carruurta ayaa ka horreeya araggooda da'dan.

5 Sheeko xariirooyinka iyo buugaagta carruurtu waa wax fiican:
   Marka uu 9-10 bilood jiro, ilmuhu wuxuu fahmaa eraydo aad u badan iyo sida loo kobciyo wada hadal. Imika waa wakhti muhiim ah inaad u bilawdo adiga oo isticmaalaya buug sawireed ilmahaaga. Si aad u bilawdo, wada eega sawirrada oo ka hadla waxa aad arki kartaan.
   Ugu dambaynta, waxaad u guuri doontaan buugtaada qoraalka leh. Kadib waxaad ka hadli doontaan waxa ka dhacaya sawirrada waxaanad u isticmaali doontaan tan si aad macno ugu yeeshaan qoraalka. U daa ilmuhu ha tilmaamo waxyaalaha sawirradu sheegayaan. Haddii ay kugu adag tahay helista buugaagta carruurta ee luuqaddaada ku qoran, waxaad isticmaali kartaa buugaagta sawirrada ama buugaagta carruurta Swedish-ka, kuna sheegi kartaa sheekooyinka luuqaddaada. Carruurta waawayn iyo xubnaha kale ee qoysku sidoo kale gacan ayey gaysan karaan. Marka uu kula eegayo buugaagta sawirka, ilmahaagu wuxuu bartaa inuu dhagaysto oo uu hadlo, oo uu sidoo kale shiishka saaro. Waxayna ka caawisaa kordhinta eray-bixintaada!

6. Ka helista waxyaalaha ay yaqaanaan:
   *Carruurtu si gaar ah waxay xiiseeyaan sawirrada ashyaada ay hore u yaqaaneen* – gaar ahaan sawirrada ay iyaga laftoodu ka muuqdaan. Dhawaanahan waxa sahlanaaday abuurista albamkaaga gaarka ah iyo sawirrada laamineeshanka la saaray ee ashyaada ilmahaagu uu la leeyahay xidhiidh gaarka ah. Inta badan waxay yihiin dookh sugan. Waxaad ku haysan kartaa sawirrada kursiga carruurta lagu riixo waanad qaadan kartaa markaad socod u baxaysa ama bas raacayso.

7. Ciyaaraha maalin kasta:
   Ilmahaaga waxaad u tahay Tusaale. Waxaad si dhakhso ah u ogaan doontaa in carruurta yaryari ay jecel yihiin inay kaaga daydaan waxaad samaynayso. U daa ilmahaagu ha kula joogo Jikada marka aad cuntada karinayso ama weelka maydhayso. U sharrax oo u faahfaahi waxa aad samaynayso. In kasta oo ilmahaagu uu kaliya awoodi karo inuu *dhaho* dhawr eray, wuxuu fahmi karaa wax aad u badan.

8. Magacyada iyo codadka xayawaanka:
   Carruurta inta badan waxa u sahlan barashada codadka xayawaanka marka loo eego magacyadooda. Tusaale ahaan, haddii ilme uu dhaho "baaa" oo uu tilmaamo lax kujirta xerad ama buugga sawirrada ku sawiran, waxaad u sheegi kartaa inaad fahamtay: "Haa, fiiri laxda – lax yar oo dhahda "baaa". Luuqadaha kala duwan waxay leeyihiin cod xayawaan oo kala duwan, sidaa darteed waa inaad isticmaasho kuwa ku saabsan luuqaddaada. Ilmahaagu wuxuu si dhakhso ah u baran doonaa haddii xayawaanka iyo codadkoodu ay kala duwan yihiin guriga iyo goobta xannaanaynta!

9. Ciyaaraha iska-yeelyeelka:
   La ciyaarista carruurta kale wali way yara adkaan kartaa, laakiin adiga ama walaalkiis/walaashiisa wayn saaxiib ciyaar ahaan, ilmahaagu wuxuu idinka baran karaa, tusaale ahaan, sida loo quudiyo Caruusadda kadibna sarriirta loo geeyo si uu u seexan karo. Carruurtu si dhakhso ah waxay bartaan inay sameeyaan sheekooyin gaar u ah oo jiliseed oo gaagaaban. Barashada ciyaarista, isticmaalka mala-awaalka iyo abuurista sheekooyinku waxay u taagan yihiin horumar wayn oo ilmuhu ka gaadhay safarka dheer ee koboca luuqadda.

10. Ciyaaraha iyada oo la isticmaalayo dareemada oo dhan:
    Si aad u hubiso xirfadaha luuqaddu inay sii wadaan koboca, carruurtu waa inay la kulmaan inta ugu badan ee madadaalo iyo wada hadalo dabiici ah iyo ciyaaro. Dhaqdhaqaaqa – HOOS guurguursho, DUL fuulis, WAREEG, DUSHA – barashada erayada sharxa ficiladana waxay sidoo kale u fiican yihiin koboca luuqadda, iyo sidoo kale dhaqdhaqaaqa jidhkooda!

## *2. Laga soo bilaabo eray kaliya ilaa kuwa badan*

Marka ilmahaagu bilaabo dugsiga xannaanada, wuxuu la yeelanayaa xidhiidhkii u horreeyey ee rasmi ah luuqadda Swedish-ka. Isla markaa luuqadda hooyo ee ilmahaagu waxay sii wadi inay sii kobocdo. Carruurtu waxay ku kobcaan xawligooga gaarka ah, tanna waxa kamid ah xirfadahooga luuqadda. Laakiin marka barashada eray-bixintu bilaabanto, si dhakhso ayuu ku socdaa. Carruurtu waxay isticmaalaan luuqad jidheedkooda iyo israacsanaanta jumladaha si ay naftoodu u fahmaan, xiitaa haddii dhawaaqoodu aanu si cad loo fahmeyn. Xasuusnawna inaad sugto si dulqaad leh, dhagaysato oo aad siiso ilmahaaga wakhti badan si uu isku sharraxo.

Carruurta luuqadaha badan yaqaan waxay leeyihiin eray-bixino kala duwan guriga iyo dugsiga xannaanada, sida luuqadda loogu isticmaalayo xaalado kala duwan. Carruurta luuqadaha badan ku hadla iyo waalidkood inta badan waxay is weydaarsadaan luuqadaha markay hadlayaan. Luuqadaha kala duwan waxa loo isticmaalaa carrab ku adkayn ama mid ayaa aad ugu habboon xaaladda lagu jiro. Waalidka luuqado badan ku hadla waxa aad u tahay ku dayasho ilmahaaga, waxaanad bari kartaa ilmahaaga sida la isu dhaafsado luuqadaha kala duwan xaaladaha kala duwan.

Ilmahaagu wuxuu waajihidoona Swedish badan marka uu sii waynaadaba. Marka carruurtu aad u yaryar yihiin, waa inaad kula sheekaysato luuqaddaada hooyo, laakiin sidoo kale u oggolow inay isku dayaan luuqaddooda cusub hadday rabaan. Markasta waxa fiican inaad ugu jawaabto ilmahaaga luuqaddaada hooyo. Tani waa khayaano si loo helo dheelitir, sidaa darteed ilmahaagu wuxuu ka maqlo luuqadda hooyo in ku filan badanka, laakiin sidoo kale wuxuu haystaa fursadda uu ku muujinayo aqoontiisa sii kordhaysa ee luuqadda cusub.

Mid kamid ah hababka ugu fiican si loo horumariyo eray-bixinta ilmahaaga waa in akhriska lagu dhawaaqo ama loo sheego sheeko xariirada. Tani waxay siisaa ilmahaaga erayo badan oo ay dhici karto inaanad isticmaalin hadalka maalinlaha ah. Ku dhawaaqa akhriska ee buug sidoo kale waxay u oggolaataa ilmahaagu inuu ogaado xarfaha, erayada iyo buugaagta la isticmaalayo. Sidoo kale, ilmuhu wuxuu bartaa qaddarinta inta buugaag madadaalo lahaan karaan! Booqda iskuna raaca maktabada-buugaagta. Shaqaalaha goobta joogaa waxay kaa caawin karaan helista buugaagta madadaalada ee ku habboon. Waa fikrad fiican inaad u dhaqanto sida qof lagu dayanayo adiga oo ku faraxsan akhrinta buugaagta iyo jaraa'idada, iyo adiga oo ka raadinaya waxyaalo buugaagta laga baaro – carruurtu waxay jecel yihiin inay ku daydaan dadka waaweyn

Sidoo kale waxa aad jeclaan kartaa inaad sheekada ka sheekayso –adiga oo aan buug isticmaalayn. Waa fikrad fiican inaad ka sheekayso hal sheeko dhawr jeer si ilmahaagu u aqoonsado. Kaqaybgali walaalihii una oggolow ilmahaagu inuu dib uga sheekeeyo sheekada isaga oo isticmaalaya erayo iyo jidh ka hadal.

Waxa la soo gaadhay wakhtigii ilmahaaga aad bari lahayd xarfaha. Waxa aad rabi kartaa inaad qaado heesta xarfaha, ama aad ku dhejin lahayd xarfo birlab ah albaabka tallaagadda. Dabcan, ilmahaagu wali uma <u>baahna</u> inuu barto xarfaha, laakiin waxa fiican inaad tusto ilmaha in xarfuhu ay dhammaantood inagu hareeraysan yihiin, iyo waxa aynu ku qaban karno.

1. Akhrinta buugaagta iyo sheekooyin ka sheekaynta:
   Shaqada guriga waa lagu mashqulaa waana dhib, sidaa daraadeed waxa fiican haddii aad isku dayi karto inaad wakhti qabato – *kahor* inta ilmahaagu aanu daalin oo aad wada fadhiisataan oo wada akhridaan. Inta wakhtigan lagu jiro, dadka waaweyn iyo walaalihiisa waawayn waxay u hadli karaan qaab ka caawinaysa inuu kobciyo ilmuhu xirfadihiisa luuqadda. Tani sidoo kale waxay khusaysaa marka akhrinta buugaagta sawirka. U daa ilmahaagu ha doorto eh *buuga* uu akhriyayo. Ka bilaw inaad ka hadasho jaldiga buuga. Maxaad ku arki kartaa? Ma aqoonsatay wax kamid ah jilayaasha? Isticmaal fartaada si aad ugu tilmaanto cinwaanka buuga marka aad akhriyeyso magaca buuga. Maxaad u malaynaysaa buugu inuu kusaabsan yahay? Abuur woxogaa saadaalin ah! U hadal si qunyar ah oo dareen leh. Isku day inaad isticmaasho cod gaar ah qof ama jile kasta buuga.

   Luuqadda qoran ee aad ka heleyso buugaagta marmarka qaar way ku yara adkaan kartaa carruurta aadka u yar. Xaaladdan kaga sheekee sheekada eraydaada ereyo kala duwan adiga oo isticmaalaya sawirrada, laakiin isku day inaad isticmaasho ugu dhawaan erayo isku mid ah wakhti kasta. Sidoo kale waxaad isticmaali kartaa albamkaaga sawirrada si aad uga hadasho waxa aad samayn jirtay iyo waxa dhacaya sawirrada. Kadib marka aad samayso tan dhawr jeer, waxa aad waydiin kartaa ilmahaagu inuu isku dayo oo uu dib uga sheekeeyo sheekada isaga oo isticmaalaya sawirrada.
   Marka ilmuhu uu dhagaysto sheekooyinka iyo sheeko xarriirada ee uu bilaabo hadalka isaga oo isticmaalaya sawirrada, wuxuu baran doonaa sida sheekooyinka la isku raaciyo: bilaabid, ficil, dhammaad.

2. Heesaha carruurta:
   Habdhacyada iyo heesaha carruurtu waxay awooda saaraan laxanka luuqadda iyo isku mid ahaanshaha qaab dhammaadka eraygu u dhawaaqayo, tusaale ahaan, faras/dambas/garas. Xiitaa carruurta aadka u yaryar way ka heli karaan laxanka habdhaca iyo sadarka. Si sahlan u aqoonsiga habdhacyada iyo shiish saarka codadka luuqaddu waxay siisaa aasaas fiican casharrada akhriska ah ee u horreeya ilmaha marka uu dugsiga galo.

3. Keen:
   "Keen" waa ciyaar muhiim ah carruurta yaryar taasi oo lagu ciyaari karo meel kasta: Marka aad diyaarinayso miiska, beerta falayso ama hagaajinayso baabuur. “Keen” waxay horumarisaa xirfadaha luuqadda iyo xasuustaba. Waxa aad isku dayi kartaa, tusaale ahaan: “Ma ii keeni kartaa buskudka?”. Haddii tani shaqayso, shaqada waad sii yara adkayn kartaa adiga oo waydiinaya dhawr shay isla markiiba ama ku siyaadinaya tafaasiil sida midabyada, tirooyinka ama halka shayadu yaalaan.
   Sidoo kale ilmahaagu waxa uu baran karaa macnaha erayada *gudaha*, *dusha hoosta* iyo sidoo kale *ka dambeeya*, *ka horreeya* iyo *ku xiga* isaga oo hawlo yaryar samaynaya. Marka aynu kala hagaajinayno guriga, waxaynu ku ridnaa toyiska sanduuqa.

4. Filim wada daawada:
   Waxa aad u duubi kartaa barnaamijyada carruurta yaryar ama filim ayaad wada daawan kartaan ilmahaaga. Tani waxay kuu oggolaanaysaa inaad joojiso oo aad ka hadasho waxa aad arki karto. Isticmaal hab la mid ah habkii akhriska buug: ku bilaw ka hadalka cidda aad u malaynayso filimku inuu kusaabsan yahay iyo waxa aad u malaynayso inay dhici doonaan. Daawashada TV-ga ee kalida ah uma wanaagsano carruurta kayar 3 jir. Barnaamijka TV si joogto ah ayuu u socdaa mana jiro wakhti la joojiyo ama su'aalo la waydiiyo – wax kasta waxaynu samayn marka aynu wada sheekaysanayno.
   Haddii ay kugu adkaato helista filimo fiican oo luuqaddaada hooyo ah, waxa aad daawan kartaa filim Swedish ah kagana hadli kartaan luuqaddiina.

5. Sahami adduunka dhijital ahaan:
   Carruurtu aad ayey uga helaan taleefanada, kombiyuutarrada iyo aalada-tablet-ka, gaar ahaan haddii ay arkaan adiga oo isticmaalaya. Waxa jira barnaamijyo ilmaha ku habboon oo badan kuwaasi oo ka caawinaya koboca luuqadda kuwaasi oo aad wada isticmaali kartaan adiga iyo ilmahaagu. Isku soo wada duuboo: Ka wada hadla waxa aad aragtaan iyo waxa aad samaysaan. Tani waa sida ciyaaruhu u caawin doonaan kobcinta luuqadda iyo fahamka ilmahaaga.

6. Maxaad qabatay maanta?
   Haddii aad waydiiso 3 jir "Maxaad qabatay maanta?" ama "Maxaad cuntay qadadii maanta dugsiga xannaanada?", jawaabtu inta badan waxay tahay "Garan maayo". Sidaa darteed waa fikrad fiican in lagu dhiirigaliyo qof kastaa inuu ka hadlo wixii uu sameeyey maalintii ama dhawaan. Ilme 3 jir ah, tani waxay siisaa ku dayasho fiican waxaynu ku boorisaa inuu sidoo kale la wadaago. Sidaynu la wada socono: carruurtu waxay ku daydaan inaga.

7. Ciyaaraha khayaalka ah:
   Door-ciyaarka iyo ciyaaraha khayaalka, ama "aynu iska yeelyeelno ciyaaraha", waa horumarro muhiim ah koboca ilmahaaga. Carruurta qaarkood si dabiici ah ayey u qaataan noocan ciyaarta ah, laakiin qaar kale ayaan u baahan kara woxogaa caawimo ah si ay u bilaabaan. Tusaale ahaan, waxa aad iska yeelyeeli kartaa inaad joogto tukaanka Casariyaha lagu iibsho. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa codad kala duwan door kasta, ciyaartuna ay noqon kartaa isku jir xiise badan ee ee khayaalka iyo runta.

### *3. Weedho oo dhan iyo sababaynta*

Eray-bixinta ilmahaagu waxay sii soconeysaa inay siyaado intaad u wada hadlaysaan qoys ahaan, ka sheekaynaysaan sheekooyin oo aad wax wada akhriyeysaan. Aqoon ballaadhan oo erayada ah dhammaan luuqadahaaga waxay muhiim u tahay koboca luuqadda, sidoo kalena waxay ka caawisaa barashada akhriska iyo qorista ee dugsiga. Waa sahal inaad fahamto waxa qoraal kusaabsan yahay haddii aad taqaanay erayada. Sidoo kale waxa sahlan inaad aqoonsato erayada qoraalka oo aad sare ugu dhawaaqdo.

Waxaynu sidoo kale ka hadalnay sida ay muhiimka u tahay inaynu is-dhagaysano, tanina way khusaysaa carruurta iyo dadka waaweynba. Si aan si fiican ugu dhagaysano, waa inaynu soo jeednaa oo awoodna u leenahay inaynu xoog saarno. Si fiican u dhagaysigu aad ayey muhiim u tahay marka la baranayo akhriska iyo qorista.

Ilme 4 jir ahi si cad ayuu u hadlaa waxaanu isticmaalaa weedhoha oo dhan. Xiitaa dadka aan garanayn ilmahaagu way fahmi karaan waxa uu dhahayo. In badani waxay dhac aysay ilaa markii ilmahaagu yaraa, cad bilaa caawimo ah kaasi oo isku muujiya qaylo iyo luuqad jidheed – hadda waxa jira qof yar oo wax sababaynaya, su'aal badan, hadal badan oo ku hortaagan! Qofkan yari waxa marka dambe uu xiise u yeelan doonaa luuqadda qoran sidoo kale. Marka uu arko qof weyn oo wax akhrinaya oo qoraya, ilmahaagu wuxuu bilaabi inuu "qoraal ciyaaro" oo uu ku qoro farriimo yaryar feegaryada – kuwaasi oo aad akhri karto ama aanad akhriyi karin!

Qaybtaan, waxaanu soo jeedinaynaa qaar kamid ah hawlaha madadaalada kuwaasi oo ka caawin doona ilmahaagu inuu kobciyo awoodiisa ka sheekaynta sheekooyinka oo tusinna doonta sida erayadu u dhawaaqaan una muuqdaan. Waa fiican tahay haddii carruurtu ay bilaabaan inay ku heesaan waxyaalahan marka ay dugsiga bilaabayaan.

1. Gal adduunka buugaagta:
   U akhri oo uga sheekee sheekooyin ilmahaaga. 4 jir sida badan si soo jeeda ayuu u dhagaysan karaa sheekooyinka yara dhaadheer ee adag fahamkooda. Haddii ilmahaagu uu tago dugsiga xannaanada, shaqaaluhu iyo macalimiinta luuqadda hooyo waxay soo jeedin karaan buugaag fiican oo ku qoran luuqaddaada hooyo. Haddii aad isticmaasho buugaagta Swedish-ka, waxaad ugu tarjumi kartaa sheekooyinka luuqaddaada hooyo. Markasta ka bilaw adiga oo eegaya jaldiga, akhriyaya cinwaanka oo abuuraya saadaalin: muxuu buugani kusaabsanaan karaa?
   Markaad bilawdo inaad akhrido buugaagta Cutubyada leh, waxa fikrad fiican ah inaad dib ugu soo celiso kahor intaanad hore uga sii socon akhriska: wixii markii u dambaysay dhacay; ma xasuusataa? Tani waa fursad fiican si aad u adeegsato dib u sheegista. Ka hadalka wixii hore u dhacay waxay caawisaa xoojinta xasuusta iyo waayo-aragnimada. "Ma xasuusataa markii walaashaada yar ay dhalatay?"

   Marka aad wax la akhriyeyso ilmahaaga waxaad ku tilmaami kartaa sadarrada qaar fartaada si aad ugu oggolaato in inuu raaco erayada. Jooji hadda iyo wixii ka dambeeya inaad eegto sawirrada ama sharrax eray aad u malaynayso ilmuhu ay dhici karto inaanu fahmin – laakiin ha kala jarin sheekada xiisaha leh inta badan!

Waxaad u soo jeedin kartaa dareenka ilmahaaga xarfaha cinwaanka buuga kuwaasi oo aad agtahay ilmuhu inuu fahmayo, tusaale ahaan, kuwa jira magaciisa. Laakiin sida u samee qaab aan joogto ahayn. Waxa fiican inuu ogaado in xarfuhu ay leeyihiin magaca iyo cod.

2. Ciyaaraha habdhaca:
Ciyaaraha habdhacu waxay noqon karaan qaar fiican oo madadaalo ah in la ciyaaro. Si aan u awoodno inaynu habdhaca ilaalino waa inaynu si fiican u dhagaysano sida dhammaadyada eraygu u dhawaaqayaan. “Waxa jiri jirtay bisad, taasi oo ku noolayd ------ koofiyad.” Macne ma leh haddii ay kharibanto, waxa uun fiican abuurista habdhac erayo ka kooban. "Full, bull, tull, rull...". Ku bilaw erayo gaagaaban marka uu ilmahaagu ka adkaadana, waad kasii yara adkayn kartaa adiga oo isticmaalaya erayo kuwaas hore ka dhaadheer. Haddii ilmuhu leeyahay walaal, waxay ku tartami karaan si aad u aragto cidda heli karta erayada ugu habdhaca leh. Carruurtu inta badan way caajisaan markay basku ku socdaalayaan ama baabuur. Samee xaaladaha intooda badan!

3 Kuwee baa is leh?
U dhigista eraydaa kooxo waa ciyaar luuqadeed madadaalo leh. “Bisaddu waa xayawaan. Ma ka fikir kartaa xayawaano kale?” Waa maxay qalabka/alaabta qolkaas yaalaa?” Sidoo kale waxaad ka hadli kartaa iska soo horjeedyada. Luloonaya/firfircoon, adag/jilicsan – tani waxay ku lug leedahay sababayn badan, sidaa darteed ha la yaabin haddii aad hesho jawaabo aan la filayn oo hal-abuur leh!

4. Tukaamaysiga cuntada iyo furfurista:
Tukaamaysiga cuntadu wuxuu u noqon karaa madadaalo carruurta. Waxa aad u dhiibi kartaa ilmahaaga shaqo yar: “Ma dhigi kartaa kartoon ukun ah salladda tukaamaysiga?” Marka aad guriga kusoo laabataan, u daa ilmahaagu ha faaruqiyo baagaga hana ku dhigo alaabta kabadhka. Dabacan, waxa dhakhso badnaan karta haddii aad adigu qabato, laakiin samaynta sidan waxay ka dhigan tahay ilmahaagu inuu barto wax badan kana qayb qaadan karo hawlaha. Carruurtuna sidaas ayey jecel yihiin!

5. U fiican luuqadda iyo xasuusta:
Ciyaar si aad ah looga ciyaaro Sweden si ay uga caawiso carruurta inay xasuustaan erayo kala duwan waa “Markab ayaa sida”. Haddii aad rabto inaad isticmaasho magacyo, waxaad odhan kartaa “ Markab ayaa sida Anna”, iyo u tuur kubadda qof kale. Kadib waa markii ilmuhu kugu soo tuurayey kubadda ama cid kale ku tuuray magacna ku dar: “Markab ayaa sida Anna iyo Samuel”. Kadib kubadda waxa lagu tuuray qof kaasi oo ku celiyey labada magaca mid saddexaadna ku daray, iyo wixii la mid ah ilaa qofi awoodi waayo inuu xasuusto magacyada oo dhan. Carruurta badankoodu da’dan waxa ku adkaan doonta inay xasuustaan kabadan afar magaca.

6. Magaca ilmahaaga – sabuurad isbiriin leh oo wax lagu qorayo:
Ilmahaagu shaki la’aan wuxuu wax sawirayey muddo dheer. Hadda waxaad waydiin kartaa ilmahaagu inuu ku qoro magaciisa sawirka, sidoo kale waxa uu u micnihiisu yahay. U dheh xarfaha magaca si qunyar ah. Ka fikir sida uu xarafa

walaba u *dhawaaqo*. Haddii tani adag tahay, waxa aad qori kartaa magaca ilmahaaga kadibna waxaad u oggolaan kartaa ilmahaagu inuu kaa minguuriyo. Waxaad sidoo kale ka raadin kartaa xarfaha kiiboodhka kombiyuutarka aadna garaaci kartaa. Haddii ilmahaagu ka helo tan, waxaad sii wadi kartaa magacyo iyo erayo kale. Carruurta aadi karta dugsiga xannaanadu waxay baran karaan qorisa magacooga iyaga oo isticmaalaya xarafaha Swedish-ka. Haddii aad ku isticmaasho alif-ba' ka duwan guriga, ilmahaagu wuxuu ka heli karaa madadaalo inuu barto sida loogu qoro magaciisa alif-ba'da luuqadda hooyo sidoo kale.

7. Dhisidda sheeko:
Si aynu sheeko uga sheekayno, waxaynu u baahanahay sida sheekooyinka looga "dhiso" – horudhac, ficilo iyo dhammaad. Safar dheer iyo socdaal ayaa u muuqan doona inuu aad u gaaban yahay una madadaalo badan yahay haddii aad sheeko wada samayn kartaan. Habka ugu sahlan waa inaad ku bilawdo adigu, oo aad ilmahaagana u dayso mala-awaalkiisa si aad u sii wadaan sheekada. Kadib waxaad qaadan kartaa kaayeysi si aad wax ugu dartaan sheekada. Haddii aad hayso rikoodh (duube), waxa aad u fiican inaad duubto sheekada oo aad dib ka dhagaysataan! Ilmahaagu sidoo kale wuxuu ka heli karaa inuu iska yeelyeelo inuu ku qoro sheekada warqad. Inuu iska yeelyeelo inuu qorayo waxay ka caawisaa ilmuhu inuu ku waajaho luuqadda qoran isaga oon ka walaacsanayn qaabka ama waxa uu qorayo. Shaqadaadu markaa waa inaad isku daydo inaad akhrido! Waa inaad markasta dhiirigaliso dadaaladan qoraalka!

8. Erayada dhaadheer iyo kuwa gaagaaban:
Ciyaartan waxay ku lug leedahay *dhagaysiga* erayda dhaadheer iyo kuwa gaagaabanba, tusaale wakhtiyaa socdaalka baabuurka ama safka iyo qolalka sugista. Dheh eray dheer iyo mid gaaban, tusaale, maroodi / ey oo waydiina ilmahaagu inuu sheego ta gaaban. Waxaad isku dayi kartaa xidhiidho kale laakiin hubi inaad ku ilaaliso erayga dheeri inuu run ahaan u dheer yahay, ka gaabanna run ahaan u gaaban yahay si aad ilmaha ugu sahasho.

9. Tani maxay noqon kartaa?
Ku tabobarka dhagaha maqalka codadka kala duwan waa ciyaar fiican, iyo waayo-aragnimo heersare ah si aad ugu diyaariso ilmahaaga barashada akhriska iyo qorista. *Eraygani muxuu noqon karaa: sss-uuu-nnn? Tanina maxay noqon kartaa: mmm-e-sss*? Ku bilaw erayo gaagaaban – 2 – 3 codad – iyo gaar ahaan erayada ay kujiraan codadka aad jiidi karta marka aad dhahayso. Haddii tani guulaysato, waxaad isku dayi kartaa erayo ka yara dhaadheer!

10. Dareen laxanka: sacabbee, bood, tun.
Dareemista laxanka luuqad waa madadaalo iyo faa'ido waxbarashada. sacabbo tunka dhawaaqyadu waa hal hab oo loo ciyaaro laxanka erayda, waxayna ka caawisaa ilmahaaga fahamka erayada dhaadheer ama gaabaan qaab ka duwan ciyaarista codadka. Dabcan, waxa fiican in la isticmaalo labada habba.
Isku day inaad dhahdo magaca ilmahaaga adiga oo tumaya sacabka ama boodaya dhawaaq kasta: "Ly-di-a, taasi waa saddex sacab!" kadib waydii ilmahaaga inuu sameeyo sidaas oo kale – marka hore idinka oo wadajira, kadib kalidii. Caawi ilmahaaga haddii laga maarmi waayo. Marka magacu sii dheeraadoba, dhawaaqyada ayaa bata ilmahana way kusii adkaataa.